# Waa maxay baaritaanka dhiiga ee TB?

Baaritaannada dhiiga ee xanuunka qaaxada (TB), oo sidoo kale la yiraahdo interferon Gamma Release Assay ama IGRA, waa hal qaab oo lagu ogaanaayo in jeermiska TB ku jiro jidhkaaga. Labada baaritaan ee dhiiga ee la heli karo ayaa kala ah **QuantiFERON®-TB iyo T-SPOT®.TB.**

## Waa inaad martaa baaritaanka TB-da haddii:

- aad si joogto ah uga ag-dhawayd qof qaba xanuunka caabuqa TB-da ee fircoon,
- aad ku noolayd wadan ay joogaan dad badan oo qaba xanuunka TB,
- aad ka shaqeyso ama dagan tahay xarun kalkaalin, isbitaal, xabsi, ama xarumaha dadka hooy la'aanta ah.
- ama uu nidaamkaaga difaaca jirka uusan awood badan lahayn.

Ilmaha ka yar 2 sano jir waa inay maraan baaritaanka maqaarka ee TB badelka ay mari lahaayeen baaritaanka TB ee dhiiga.

## Sidee ayaan ku helayaa baaritaanka dhiiga ee TB?

Waydii dhakhtarkaaga. Wuxuu kaa qaadayaa dhiig yar kadibna u dirayaa shaybaadhka. Dhakhtarkaaga ayaa kuu sheegaaya haddii natiijada baaritaankaagu sheegto inaadan qabin ama aad qabto caabuqa dhawr maalmood gudahood.

## Ka waran haddii baaritaanka TB-da aan la iiga helin caabuqa?

Baaritaanka dhiiga ee TB ee aan caabuqa lagaa helin ayaa caadiyan ka dhigan in aynan jeermisyada TB ku jirin jidhkaaga.

## Ka waran haddii baaritaanka TB-da la iiga helo caabuqa?

Natiijada baaritaanka dhiiga ee TB ee lagaa helay ayaa ka dhigan in jeermisyada TB-du ay ku jiraan jidhkaaga. Inta badan dadka dhiigooda laga helo TB ayaa qaba caabuqa qarsoon ee TB. Si loo xaqiijiyo, dhakhtarkaaga ayaa ku baari doona kadibna samayn doona raajada xabadka. Waxaad u baahan kartaa baaritaanno kale si loo hubiyo inaad qabto caabuqa TB ee qarsoon ama TB-da fircoon.

## Waa maxay caabuqa TB-da ee qarsoon?

Waxaa jira labo nooc oo TB ah. Labada wajiyoodba waxaa lagu dawayn karaa daawo.

Marka jeermisyada TB ay galaan jidhkaaga, waxay sababaan caabuqa qarsoon ee TB. Haddii aan la dawayn, TB-da qarsoon ayaa noqon karta TB fircoon.

| **Wajiga 1 –<br>Caabuqa TB-da ee qarsoon** | **Wajiga 2 –<br>TB-da Fircoon** |
|---|---|
| Jeermisyada TB ayaa ku kaydsan ('hurda') jidhkaaga. Wajigaan ayaa socon kara muddo dheer - oo xataa ah sanado badan. | Jeermisyada TB ayaa shaqeynaaya ('soo jeeda') wayna faafayaan. Waxyeelo ayay ku hayaan nudooyinka jidhkaaga. |
| Uma ekid mid xanuunsan ama ma dareemaysid xanuun. Raajada lagaa saaro xabadka ayaan badanaa muujinaysa inaad wax dhibaato ah qabin. | Waxaad caadiyan dareemaysaa xanuun. Dhakhtarkaaga ayaa samayn doona baaritaanno gaar ah si loo ogaado in jeermisyada TB ay waxyeelaynayaan jidhkaaga. |
| Kuma faafin kartid jeermisyada TB dadka kale. | Haddii jeermisyada TB-da ay ku jiraan sanbabooyinkaaga, waad qaadsiin kartaa TB-da dadka kale marka aad qufacdo, hindhisto, hadasho, ama heesto. |
| Waxaa lagu daweeyaa cunista hal ama labo daawo sadex ilaa afar bilood. | Waxaa lagu daweeyaa saddex ama afar daawo ugu yaraan lix bilood. |

## Ka waran haddii aan qaatay talaalka BCG?

Talaalka BCG (talaalka TB) ayaa ka difaacaaya carruurta yaryar inay aad ula xanuunsadaan TB-da fircoon. Difaacaan ayaa meesha ka baxaaya marka dadku sii waynaadaan.

Dadka qaatay talaalka BCG ayaa wali qaadi kara caabuqa TB-da ee qarsoon iyo caabuqa TB-da ee fircoon.

Haddii aad qaadatay talaalka BCG aadna leedahay dookha inad samayso baaritaanka dhiiga ee TB ama baaritaanka TB ee maqaarka, waxaa haboon inaad marto baaritaanka TB ee dhiiga. Sababtoo ah

baaritaanka TB ee dhiiga ma soo gaarto saamaynta talaalka BCG. Tan ayaa ka dhigan in baaritaankaaga TB-da uu sheegaayo inaad xanuunka qabto keliya haddii jeermisyada TB ku jiraan jidhkaaga.

Difaac caafimaadkaaga iyo caafimaadka qoyskaaga – qaado baaritaanka dhiiga ee TB!

Minnesota Department of Health
Tuberculosis (TB) Prevention and Control
1-877-676-5414 or 651-201-5414
www.health.state.mn.us/tb

02/24

*Si aad xogtaan ugu hesho qaab kale, wac: 651-201-5414.*